# SHEEKADA

## DHACADA I

### Kayn mugdi ah, oo fog...

Geed aan la garaynin, Dhaxal Suge Boqor Tamino ayaa ka qaxay mas wayn oo khatar badan. Kadib markii uu ruux beelay uuna suuxay, sadex dumar ah, kuwaasoo u shaqeeya Boqorada Habaynkii, ayaa soo muuqday kadibna dilay maskii weynaa. Haweenka ayuu ka farxiyay Wiilka Boqolku waxayna u baxeen inay u sheegaan Boqorada shaqada ay qabteen. Tamino ayaa soo baraarugay kadibna wuxuu arkay shinbir ugaarsadaha Papageno, kaas uu aaminay in uu asaga badbaadshay. Papageno ayaa iska dhigay inuu dhab ahaantii cayriyay maska, laakiin sadexda haweenka ah ayaa soo laabtay kadibna ku ciqaabay Papageno beentaan ayaga oo codka ka xiray. Kadibna waxay tuseen Tamino sawirka Pamina, gabadha Boqorada. Tamino ayaa isla markiiba jeclaaday sawirkeeda. Boqorada Habaynkii ayaa intaas kadib soo muuqatay, ayad oo u sheegtay Tamino in gabadheeda uu afduubtay shaydaanka Sarastro. Waxay ku amartay inuu soo badbaadiyo, Tamino ayaa ka baryay ilaahyada inay caawiyaan si uu gabadha u helo. Sadexda haween ah ayaa soo laabtay, ayaga oo codkiisa u soo celiyay Papageno codkiisa; kadibna waxay siiyeen fuuq sixireed Tamino iyo ganbaleel sixreed ay siiyeen Papageno si loo ilaaliyo badqabkooda inta ay ku jiraan shaqada soo badbaadinta Pamina. Waxay sidoo kale keeneen genies kaas oo ku hagi doona safarkooda.

Meel u dhow kaniisada Sarastro, adoonkiisa Monostatos ayaa ilaalinaaya Pamina, laakiin imaatinka Papageno ayaa cabsi gelisay Monostatos. Papageno ayaa u sheegay Pamina in Tamino uu jecel yahay ayada uuna soo socdo si uu u badbaadiyo. Papageno ayaa sidoo kale qiray in uusan wali helin qof uu jeclaado, iyo Pamina ay farxad geliso. Sadexda genies ayaa ku hogaanshay Tamino kaniisada Sarastro, halkaas oo baadari meesha joogay uu u sheegay Tamino in Boqorada, maahan Sarastro, cida rasmiga ah
ee falka afduubka gaysatay. Ayada oo aad ugu faraxsan in Pamina wali nooshahay, Tamino ayaa yeeriyay hoonkiisa, asagoo ku luuqeeyay muusigiisa. Wuxuu maqlay tuubooyinka Papageno
meel fog wuuna ku orday si uu u gaaro. Ayada oo taas jirto, Papageno iyo Pamina ayaa iskudayay inay ka baxsadaan kaniisada, laakiin waxaa qabtay Monostatos iyo ugaarsatadiisa. Papageno ayaa ka dhawaajiyay ganbaleelka sixirka, kaas oo cabsi geliyay dadkii cayrsanaayay. Sarastro ayaa ku soo galay xaflad wayn. Wuxuu ciqaabay Monostatos wuxuuna u sheegay Pamina in uu ugu danbayn xoriyadeeda u celin doono. Pamina iyo Tamino ayaa muddo kooban is arkay, laakiin Sarastro ayaa kala fogeeyay. Wuxuu amray inay hadda qasab tahay inay waajahaan dacwado taxane ah.

## AAMUSKA

## DHACDADA II

### Tijaabada Aamuska

Sarastro ayaa ku bilaabay akhris Tamino iyo Pamina, laakiin Papageno ayaan awoodin inuu dhameystiro. Baadariyaasha Sarastro ayaa u sheegay Tamino iyo Papageno in dacwadooda koobaad bilaaban rabto: waa qasab in aysan hadlin. Sadexdii haweenka ahaa ayaa yimid iskuna dayay inay ku qanciyaan inay dacwada joojiyaan, ayaga oo ku cadaadiyay in labadooda qof xaliyaan. Tamino ayaa aamuska laasimay oo is ilaaliyay, laakiin Papageno oo ah qof aan warka ceshan karin ayaa durbadiiba bilaabay hadal. Isla markaas, Monostatos ayaa markale iskudayay inuu u dhawaado Pamina oo huruda. Boqorada Habaynkii ayaa ku soo baxday Pamina ayaga oo kicisay kuna amartay inay disho Sarastro. Pamina ayaa ku murugootay fikirka, Sastro ayaana u heesay Pamina asagoo u sheegay in kaniisadiisa ay qofka mamnuuc ka tahay inuu aargoosto.

### Tijaabada Damaca

Tamimo iyo Papageno waa inay diidaan damaca: ma wada sheekaysan karaan, ma eegi karaan dumarka, cuntana ma cuni karaan! Sadexda genies ayaa u muuqda in ay Tamino iyo Papageno u keeneen cunto, Tamino ayaa diiday cuntada halka Papageno uu qaab aan uu guleysan iskugu dayay inuu iska diido. Markii Pamina timid ayaga oo dooneysa in Tamino
la hadlo, wali wuxuu ku adkaystay balanqaadkiisa aamuska, kaas oo ay u fahantay inuu diiday. Waxay qalbi jab ka qaaday in Tamino u muuqdo inuusan jaceyl u qabin ayadaa. Sastro ayaa isku keenay Pamina iyo Tamina si ay isku macsalaameeyaan kahor imtaxaanka ugu danbeeya. Papageno ayaan doonayn inuu ka qaybgalo imtaxaanaad kale; wuxuu hadda keliya doonayaa khamri, wuxuuna ku riyoonayaa inuu maalin uun heli doono jaceylkiisa dhabta ah. Pamina ayaa aaminsan inay si abadiyan ah u lumisay Tamino; murug awgeed, waxay damacday inay isdisho, laakiin sadexda genies ayaa joojiyay.
Waxay u xaqiijiyeen in Tamino wali jecel yahay, waxayna u ka xeeyeen inay markale soo aragto Tamino. Ayada oo baadariyada Sarastro ay u raaceen Tamino imtaxaankiisa ugu danbeeya, Pamina ayaa ka helay
salka hoose ee kaniisada. Ugu danbayn ayaga oo mideysan, Tamino iyo Pamina ayaa isla galay imtaxaanka.

### Tijaabada shanta iyo Biyaha

Muusiga fooriga sixirka iyo awooda jaceylka ayaa u sahlay Tamino iyo Pamina inay ka adkaadaan khataraha tijaabada dabka iyo biyaha. Codadka taageereyaasha Sarastro ayaa ku dhawaaqay farxad.
Hase yeeshee, Papageno ayaan wali helin jaceylkiisa dhabta ah, inkasta oo uu ku riyooday. Asagoo murugsan, ayuu damcay inuu isdilo laakiin sadexda genies ayaa markale soo faro geliyay
oo ishortaagay. Riyada Papageno ayaa ugu danbayn dhab noqotay: Papagena ayaa soo baxday kuna biirtay.
Waxay isla cabireen mustaq ay ilmo badan isku dhalaan. Isla markaas, Boqorada Habaynka, sadexda haweenka ah, iyo Monostatos ayaa dhuumasho ku soo galay kaniisada, ayaga oo doonaaya inay weeraraan Sarastro ayna Monostatos u guuriyaan Pamina. Hase yeeshee, weerarkooda ayaa la iska difaacay, waxayna dhexda u galeen mugdi aan abidkiis dhamaanayn. Tamino iyo Pamina waxaa u sacabiyay taageereyaasha Sarastro, kuwaasoo noqday lamaanaha cusub. Waxay ku heeseen mahad celinta ilaahyada, ayaga oo u dabaal degay in si ruuxi ah loogu caleema saari doono qurux iyo xikmad.